

## Dulmarka Guud ee Nidaamka Cabashada Bulshada ee la xariira Waxbarashada Gaarka ah (SECC).

OSPI waxay heshaa cabashada bulshada ee ka dhanka ah waxbarashada gaarka ah oo dhamaystiran oo uu soo gudbiyay qofka cabanaaya. Cabashada waa la saxiixay waxaana sidoo kale loo gudbiyay dugsi degmadeedka. **(Maalinta 1 aad)**

OSPI waxay furtaa foomka cabashada waxayna warqado iimaylo ah u dirtaa degmo dugsiyeedka iyo qofka cabashada qaba, ayadoo ku xusaysa arrinta lagu sameynaayo baaritaanka. Warqada degmada waxay degmada ka codsan doontaa inay OSPI u gudbiyaan jawaabo iyo dukumiinti, sida IEP-yada, warbixinada qiimeynta, nuqulka iimaylada, iwm.

Degmadu waxay haystaa **17 maalmood\*** oo isku xigga inay oga soo jawaabto arrinta(arrimaha) la doonaayo in baaritaan lagu sameeyo. \* Illaa inay waqti dheeraad ah ay ka hesho maahee OSPI.

OSPI waxay heshaa jawaabta degmada ee cabashada waxayna ku sameysaa dib u eegis si ay u xaqiijiso in dhammaan macluumaadka gaarka ah ee lagu aqoonsan karo ardayda laga saaray foomka cabashada.

OSPI waxay nuqulka jawaabta degmada iimayl ahaan ugu dirtaa qofka cabashada qaba. \*Haddii qofka cabashada qaba uusan haysan oggolaansho sharci oo uu ku isticmaali karo diiwaanada waxbarashada ee ardayga oo uusan OSPI siin oggolaansho saxiixan si ay u isticmaasho diiwaanka ardayga, OSPI ma siin doonta qofka cabashada qaba diiwaanada waxbarashada ardayga.

Qofka cabashada qaba wuxuu haystaa **10 maalmood\*** oo isku xigxiga si uu oga soo jawaabo xog kasta oo dheeraad ah oo uu jeclaan lahaa in OSPI u adeegsato baaritaanka. \* Illaa inuu waqti dheeraad ah ka helo maahee OSPI.

OSPI waxay heshaa jawaabta qofka cabashada qaba. OSPI waxay degmada u dirtaa nuqulka jawaabta uu soo diro qofka cabashada qaba.

OSPI waxay dib u eegtaa dhamaan xogta uu bixiyo qofka cabashada qaba iyo degmada maadaama ay qayb ka tahay baaritaanka.

Haddii loo baahdo, OSPI waxay qofka cabashada qaba ama degmada ka codsan doontaa bixinta xog dheeraad ah ama caddeymaha xogta. OSPI sidoo kale waxay sameyn kartaa wareysiyo iyo booqashooyin ay ku tageyso goobaha fasalka.

OSPI waxay iimayl u dirtaa degmada iyo qofka cabashada qaba go'aan qoraal muddo aan ka danbeyn **60 maalmood** oo isku xigxiga lagana bilaabaayo taariikhda ay OSPI heshay cabashada. **(Maalinta 60 aad)**

